# Ku Soo Dhawaw Goobta Nasashada ee Webiga Duwamish & Xeebta Deegaan Dabiiciyeedka

Waxaad joogtaa xeebta webiga dxʷdəw (DOOwh-duhw), Webiga Duwamish, oo u dhow goob awooweedka abtirsiineed ee loo yaqaan xʷapičəd (wha-PEE-chud). Ereygan txʷəlšucid (Lushootseed) macnihiisu waa meesha uu qof wax ku tuurayo. Dadka xeebta ee Salish-ka ee doonaya inay ka gudbaan wabiga ayaa ku tuura alwaax biyaha si ay u qiimeeyaan xoogga wabiga iyo qulqulka biyaha. Haddii alwaaxa sabaynaya si tartiib ah u dhaqaaqo, gunnaha dhaw ee mawjadaha ayaa laga yaabaa in si badbaado leh loo dhex mari karo, si ka ahaan ah marin-gaaban gudaha webiga.

Webiga Duwamish iyo dhulka ay biyahiisu ugu qulqulaan dhanka badda waa dhul awooweed abtirsiineed oo heshiiskuna wuxuu ilaaliyay dhul kalluumaysiga Qabiilka Hindiga ee Muckleshoot, Qabiilka Suquamish-ka iyo dadka u dhashay Xeebta Salish-ka. Sida uun luqadda Lushootseed ee la wadaago ee halkan looga hadlo ay dadkeeda u midayso, ayayna biyahani u mideeyaan. Waxay ku tiraabteen nolosha wakiillada asaliga ah ee la soo dhaafay, hadda iyo mustaqbalkaba. Waanu ixtiraamaynaa dhulkan iyo biyahan bulshadeena ilaalinaya waxaanan u qiraynaa goobtan nololeed iyo koritaaneed.

## Dib u cusbooneysiinta Webiga

Webiga Duwamish ayaa mar ku qaloocday dabarka marinka dooxada Duwamish. Biyaheedii iyo xeebaheedu waxa ay ahaayeen kuwo aad u badan oo ay hodan ku ahaayeen kalluunka iyo duurjoogta. Warshaduhu waxay koreen ilaa Puget Sound horraantii qarnigii 20aad. Dariiqyadii leexsanaanta gacmeed ee webiga iyo bannaanka daadku waxa lagu beddelay marin toosan oo qoto dheer. Khadadka webi xeebeedyada taariikhiga ah ayaa la buuxiyay oo loo dhisay si loogu habeeyo Isticmaalka warshadaha.

Beertan nasashada ee dadweynaha ayaa loo naqshadeeyay inay u ekaato dabar deegaaneedka dabiiciga ah ee ka soo baxay webiga asalka ahaa. Xusuusta juqraafi ee godoshada qaansada taariikhiga ah ayaa dib ugu soo baxda qaabka qaloocan/godan ee goobta hadda jirta. Looxyo waaweyn oo laga soo badbaadiyay marin-biyoodyada u dhow ayaa baroosiiyaan oona xasiliyaan xeebta dib loo soo celiyay oo ay taageerayaan geedo iyo geedo yaryar oo deegaaneedka ah. Dhirta Marsh ayaa dib loo soo celiyay si ay u siiyaan cunto iyo gabaad hoy kalluunka socdaalka iyo kuwa degan iyo duurjoogta, gaar ahaan noocyada salmon sida sacəd (SAH-tsub),, Chinook-ga. Salmon-yadani waxay aasaas u yihiin cuntada nibiriga Orca ee dabar-go'aya, iyo meelaha gaarka ah ee deegaan dabiiciyeedka ah sida tan oo kale waxay caawiyaan ilaalinta duurjoogtayada badda.

## Helida Jidkaada

Waddooyinka socodka, goobaha webiga laga arko, iyo dooxooyinka waxay u soo bandhigaan booqdayaasha fursad ay ku arkaan Wabiga Duwamish iyo deegaan dabiiciyeedka salmon ee la ilaaliyo, Baadhida dhirta iyo deegaan dabiiceedka xayawaanka ee dib loo soo celiyay. Baro wax ku saabsan nadiifinta iyo milic soo celinta beerta nasashada oo markhaati ka noqo xidhiidhka ka dhexeeya bulsho caafimaad qabta iyo deegaan adkaysi leh. Ku raaxeyso beertaada nasashada! Wixii macluumaad dheeraad ah iyo socdaalka maqalka ah ee goobta, booqo websaydkayaga.




Port of Seattle